



Dhallinyaro badan baa maanta ku foogan wax qorista gaar ahaanna curinta sheeko faneedda. Waa dhaqan wacan oo sida uu u xoogaysanayo ”kacaan” lagu sheegi karo. Maalin walba waxaa soo baxa sheekooyin u badan kuwa gaagaaban. Waa wax la isla yaqaan dhallintu qorista sheekada in ay ka bilaabaan ta gaaban (short story) inta aanay u gudbin ta dheer (novel). Taa macnaheedu ma aha sheekada gaabani in ay ka liidato ama ka qoris fudud dahay ta dheer, qofka da’da yar ayaa se ta hore ku dhiirrada kol haddii waxa la odhanayo iyo sadarrada la qorayaa ka yar yihiin ta kale.

Oogtaa belbelaysa ayaan haddaba jeclaystay in aan dogob saaro. Qoraallo hore ayaan kaga hadlay taariikhda sheeko faneedda iyo ammuuraheeda (<http://www.ibraahinhawd.com/2013/index.php/shookooyin>), halkan se waxa aan ku soo qaadayaa sida sheeko faneed loo qoro, iyo waxtarka akhriska sheekadu qofka iyo bulshada u lee yahay.

Guud ahaanba hadalka iyo wax isugu gudbintiisu waa sarrayn aadamigu noolaha kale dhaamo, taas oo mar loogu danaysto hawl maalmeedda, mar kalena xog si habaysan loo diyaariyo oo isaga tallawda maalmaha, meelaha iyo facyada. Shakina ma leh hadalka qorani in uu ka dhihidda ah ka tayo sarreeyo. Qoraalka waxaa lagu diyaariyaa waqti lagaga baaraandego oo fikir habaysan la geliyo, isla markaa erayga iyo odhaahda habboon loo xusho. Sidaas oo kale ayuu akhriskuna maqalka uga waxtarsan yahay, waayo hadalka toos lagu odhanayo haleeli maysid in aad wada maqasho, wada fahanto oo wada xusuusato, qof odhanaya qudhiisuna sida ugu habboon ee ugu dhammaystiran u ma sheegi karo. Se qoraalku intaaba wuu lee yahay oo inta aad doonto iyo sida aad doonto ayaad u dhuuxi kartaa, adiga oo u dhiganaya goorta iyo meesha kuugu habboon, sida aad doontana ugu noqnoqon kara. Sheeko faneeddu haddaba waa hadal intaaba ka sii horumarsan oo la geliyo fikir, farshaxan, erayo iyo weedho xulan oo dhadhan leh, laguna muujiyo nolosha iyo waayaha dadka oo leh xilli iyo meel.

Maxaa haddaba sheeko faneed loo qoraa? Maxaa se akhriskeeda laga dheefaa?

Waxaa sheeko loo qoraa in dadka kale la la wadaago fikirka, dareenka iyo waayaha nolosha, taas oo ah dabeecad bulshaynnimo ah. Waa isla sababta uu qofku dadka ugu sheekeeyo. Sheeko waxaa loo qoraa in nolosha lagu baadho, lagu suureeyo, laguna fahmo, dabadeed xusuus laga reebo. Sheeko akhriskuna waa tii la dhegaysan jiray uun oo qaab kale yeelatay; qaab kale oo kii hore ka habaysan kana tayo wacan. Aad bay u badan yihiin sababaha qofka jeclaysiiya sheeko akhriska. Waxaa ka mid ah in uu isku maaweeliyo. Waxaa ka mid ah in uu daawashada caalamka laga hadlayo nafta iyo maskaxda ku nafaqeeyo. Waxaa ka mid ah in uu ka dhigto aqoon iyo xog uu bulshadiisa iyo dunida wax kaga ogaado. Waxa ay u noqotaa dhaymo nafsiyadeed iyo garawshiinyo uu u helo duruufaha adag ee uu nolosha ku qabo ama ka arko. Waxa ay korisaa maskaxda kuna dhalisaa fikir iyo garasho. Waxa ay qofka ka saartaa damiinnimada iyo miskiinnimada caqliga. Waxa ay qofka

ka caawisaa fahanka nafsiyadda dadka kale, waxa ayna gelisaa bisayl iyo dulqaad. Qofnimadiisa ayay kobcisaa oo hodmisaa. Waxa uu ugu danaysan karaa xoojinta afka ay ku qoran tahay.

Dhanka kale sheekadu, sida suugaanta kale, bulshadeeda waxa ay u sawirtaa, u ururisaa, ku dhex faafisaa, u kaydisaa oo ku baraarujisaa qiyamkeeda, ahaanshaheeda iyo afkeeda iyo waayaheeda nololeed oo dhan. Sidaa darteed bulsho sheeko akhris dhaqan u lihi ma noqon karto damiinad. Facyada dambena sheekadu waa u muraayad ay taariikhdooda ka daawadaan.

Sheekada wanaagsani mar haddii ay akhristaha siiso fahan sarreeya oo uu u yeesho guud ahaan nolosha, gaar ahaanna dadka kale iyo nafsiyaddooda, fikirkooda iyo dareenkooda, waxa ay gelisaa arxan (empathy) uu waxa ay dareemayaan ku la dareemo. Arxandarro iyo nacabnimo badan oo dadka ka dhexaysa waxaa keena iyada oo la awoodi waayo in dareenka la qaybsado oo xanuunka iyo farxadda qofka kale la la falgalo. Tusaale ahaan waa ay adag tahay qof dhalinyaro ah oo sheeko akhris caado u lihi in uu qori qaato oo noqdo dilaa ama budhcad. Qofka sheekooyinka akhriyaa ma noqdo daacadmiskiin (naive) laga caqli badiyo oo wixii la doono la gashado, waayo maskaxda ayaa baraarugsan oo ifaysa. Baraaruggaa xitaa waxa uu dheer yahay qof shahaado jaamacadeed haysta aan se akhris caado u lahayn.

Sheekadu, sida suugaanta kale, waxa ay xoojisaa, horumarisaa oo qurxisaa afkeeda. Kolka sheeko la qorayo waxaa isku mar hawlgala luqadda, fikirka, aqoonta iyo dareenka nafsiga ah ee qoraaga, cadaadiskaasina waxa uu keenaa baahi ah in uu helo erayo badan si uu waxa uu doonayo u sheego.

Haddaba si ay kuugu suurtagasho in aad sheeko naf leh qorto, horta waa in aad barataa xeerarka fankaa asaasiga u ah. Waqtigan dunida waa ay ka jiraan iskuullo aqoontaa lagu dhigtaa, waxaa se ka waxtarsan kana fudud in sheekooyinka wanwanaagsan la akhristo oo sida ay u qoran yihiin loo fiirsado. Taas ayaa ah tacliinta dhabta ah ee arrintan lagu baran karo. Mar kasta oo aad wax loo akhriyo waxaa fududaata in si wanaagsan wax loo qoro, haddii ay noqoto sida qoraalka loo habeeyo, iyo haddii ay tahay sida farshaxannimada halaabuurka loo dhiso labadaba. Sidaa darteed qofka kolka hanka sheeko qoristu galo waa in uu bilaabaa akhriska sheekooyinka qorayaasha waaweyn. Laakiin isla markaa waa in uu iska ilaaliyaa qorayaasha uu jecel yahay in ay duufsadaan ama jiitaan oo uu wax walba kaga daydo. Qoraalka ku dayashada ahi naf ma yeesho, sidaa darteed marka aad sida wax loo qoro ka barato adigu hab kuu gooni ah yeelo adiga hibadaada godlaya. Waxaa laga yaabaa taadu in ay aad uga qurux badnaato tii aad wax ka baratay.

Labada masalo oo waaweyn oo asaasi ah ayay tahay in wax badan laga yaqaan si ay sheekadu u buuxiso shuruudaha looga baahan yahay. Labadaa mid waxaa lagu maareeyaa qorista hadalka, waana astaamaha qoraalka lagu ka la habeeyo. Midda kalena waxaa lagu maamulaa farshaxannimada sheekada.

Aynnu ta astaamaha ku horraynnee, guud ahaanba hadalka la qorayo haddii aan loo adeegsan astaamo lagu ka la hormeeyo waxaa soo baxaya qoraal fawdo ah oo aan madax iyo mijo ka la lahayn. Tusaale ahaan haddii aan la astayn meesha hadal ka bilawdo ama ku dhammaado foolxumada ka sokow waxaa fadqalalloobaya garashada macnaha. Haddaba astaamaha ugu mudan ee hadalka qoran lagu agaasimaa waa kuwan soo socda (eraybixintana aniga ayaa sameeyay):

1. Sadar cusub

Hadal wal oo la qorayo waxaa laga bilaabaa sadar cusub oo eraygiisa kowaad xarafkiisa kowaad la weyneeyo. Saddex siyaalood ayuu se sadarka cusubi u bilawdaa. Mar waa bilwga qoraalka, mar kale waa cutub cusub, mar saddexaadna waa faqradd cusub. Labadaa jeer ee hore dunida waa lagu ka la duwan yahay, oo dad baa sadarkaa hore saddex tallaabo gudaha geliya, dad kalena ma geliyaan. Marka saddexaad se waa laga siman yahay in faqradda hadalkii hore ku xidhan saddex tallaabo gudaha la geliyo. Sheekada "Aanadii Negeeye" anigu habka hore oo i la qurux badan ayaan u raacay, qoladii daabacday ayaa se dhawr meelood sida kale ka dhigtay.

2. Weyneynta xarafka kowaad magaca gaarka ah: Axmed, Hargeysa, Afrika iwm.

3. *Hakad* ,

Hakadka waxaa lagu gaagaabiyaa jumlada si loo muujiyo meel akhriska loogu neefsano karo, waayo kolka la hadlayaba la ma daddubiyo ee waa la yara hak'hakiyaa.

4. *Joogsi*.

Waa marka jumaladdu si buuxda u dhammaato iyada oo macne buuxa bixisay.

5. *Joogsi dhimman*;

Waxaa lagu asteeyaa meel jumladu macne buuxa ku yeelatay laakiin aanay weli joogsi buuxa gaadhin.

6. *Astaan wayddiineed?*

Waa calaamad lagu garto hadalku in uu yahay su'aal xitaa haddii aan warcelin looga baahnayn.

7. *Astaan dhawaaq!*

Waxaa lagu qoraa hadalka yeedha ama qaylada ah amaba leh lamafilaannimada sida naxdinta iyo farxadda weyn.

8. *Astaan qaylo*ASTAAN QAYLO

Erayga ama weedha oo lagu qoro xarfo wada waaweyni waxa ay macnaysaa hadalkaasi in uu yahay qaylo dheer. Waxaa kale oo xarfaha wada waaweyn loo adeegsadaa muujinta eray la doonayo in carrabka aad loogu adkeeyo ama hadalka laga soo dhex dhufto.

9. *Moos*:

Labada dhibcodd ee isdul saaraan waxaa lagu ka la soocaa faallada hadalka iyo odhaah qof toos u dhihi doono. Waxaa kale oo loo adeegsadaa hadal la soo yidhi iyo waxa hadalka loo la jeedo. Waxaa kale oo lagu qabtaa ciwaan hoosaadka faqradda.

10. *Dhibco...*

Waxa ay muujiyaan hadal isaga oo socda wax kale soo dhex galeen ama sabab kale u ka la go'ay, amaba isaga oo aan dhammaan la joojiyay.

11. *Jiitin*—

Waxaa lagu muujiyaa hadalku kolka uu darandoorri ama haasaawe yahay ee dad dhex marayo halka qof walba hadalkiisu ka bilaabanayo. Waxaa kale oo loo adeegsadaa bilawga jumlad sii qeexaysa mid iyada ka horraysa.

12. *Xero*” ”

Waxaa lagu dhex qoraa eray ama jumlad cid toos looga xiganayo, ama wax hadalka socda si uun uga gooni ah. Waxaa kale oo lagu xereeyaa eray ama weedh aan la hubin in ay sidaa ahayd, ama ujeedo aan teedii ahayn loo odhanayo.

13. *Edeg*()

waxaa la geliyaa eray ama weedh mid ka horreysay qeexaysa ama fasiraysa.

14. *Ardaa*[]

Waa astaan lagu garto waxa ku dhex qorani in ay hadalka socda marti ku yihiin ee aanay ka mid ahayn.

15. Qoqob/

Waa astaan lagu ka la dadbo laba eray ama laba weedhood oo beddel isu noqon kara.

Haddaba qoraaga da'da yar ee sheeko qorista xiisaynayaa haddii uu talo i bido waxa aan siin lahaa:

Mas'alada aad doonayso in aad wax ka qorto dhitee, bislee, daraasee oo waqti kugu filan sii. Hubi in ay tahay arrin aad aqoon kugu filan u lee dahay, waayo ma wanaagsana qofku in uu dhex galo xaalad aanu waxba ka garanayn. Haddii se arrin aadan aqoon u lahayn qisadu ku la gasho, oo aad ka fursan waydo, u maamul si xeeladaysan oo aanay aqoon la'aantaadu ka muuqanayn.

Af soomaaliga aad taqaan ama heli karto oo dhan adeegso, waayo saboolnimada erayadu suugaanta waa ay daciifisaa, badnida erayaduna waa ay qurxisaa. Intii aad erayo tiro yar ku soo celicelin lahayd oo nuxurka ka idlayn lahayd, dabadeed akhristuhu ha xiiso dhici lahaa, ku dadaal in aad hesho kuwo cusub oo aan xitaa degmadaada lagaga hadlin. Ka digtoonow qoraalkaga in ay erayadu aad u soo noqnoqdaan, waayo waxa ay caddayn u tahay saboolnimo afeed. Af soomaali badan waxa aad ka baran kartaa suugaanta, siiba tii hore. Waxa aad kale oo afkaaga ku xoojin kartaa la sheekaysiga soomaalida aydaan isku degaanka ahayn iyo dadka waaweyn.

Afka aad wax ku qorayso dux geli oo dhadhan u yeel, oo yuu kaa noqon qarax. Weedhaha sii nuxur aan muuqa uun ahayn ee dhuuxooda laga la soo bixi karo. Adeegso maamhmaah, halqabsi, sarbeeb, duurxul iyo wax walba oo dadku caadi ahaan hadalka u adeegsadaan.

Sheekadaada si wacan ugu muuji xilliga, meesha, degaanka, cimilada, dadka iyo walxaha aad ka hadlayso oo akhristuhu ha arko. Dadka sheekada ku jiraa dad uun yay iska ahaan ee ha noqdeen dad dhab ah oo qof waliba lee yahay qofnimadiisa gaarka ah: muuq, dabeecad iyo hadal ahaanba. Tusaale ahaan in la iska yidhaahdo "Ubax waa ay qurux badan tahay" si looga dhigo qof wanaagsan waa khashiinnimo, waayo wanaagga dadku quruxda muuqata ku ma xidhna, qof walbana quruxdiisa iyo wanaaggiisu waa si gooni ah. Sidaas oo kale "Axmed waa doqon" xikmadi ku ma jirto ee Axmed doqonnimada Axmed waa in ay ka muuqataa dhaqankiisa sheekada.

Shakhsiyadda sheekada dhaqankeeda iyo hadalkeedu ha ku jaango'naadeen qofkaasi ka uu yahay: ilmo yar ama qof weyn, rag ama dumar iwm, iyo duruufaha qofka sida mid tacliin leh ama qof aan lahayn, reer miyi ama reer magaal, bulshay ama qof xidhan iwm. Ma aha qofka hadalkiisa iyo dhaqankiisu in ay isburiyaan oo sabab la'aan isu beddelaan oo uu marba si u dhaqmo, ee waa in qofku mar walba isagii uun yahay. Haddii se isbeddel ku dhacayo horta waa in ay duruufta qofku isbeddeshaa: tusaale ahaan qofkii reer miyiga ahaa haddii uu reer magaaloobo fikirkiisa iyo dhaqankiisu waa ay beddelmi karaan, ama haddii saboolku hodan noqdo, ama jaahilku caalim noqdo iwm.

Sheekada waa in laga ilaaliyaa wax aan dhici karin oo garashada iyo dabeecaddu diidayaan, waana in ay ku dherersan tahay waxa ka suurtooba abuurta dadka iyo nolosha. Ogowna ma jiro qof ah sheydaan soocan ama malag soocan, qof waliba se wanaag iyo xumaanba wuu yeeshaa, qof walibana wuu gefaa. Shakhsiyaadka sheekaduna waa in ay sidaa ahaadaan.

Ku talagal akhristahaagu in uu kaa maskax iyo aqoon badnaan karo, sidaa darteed ha u quudhin khuraafaad iyo wax liita oo uu kugu quudhsado.

Iska ilaali qoraa ahaan in aad adigu qisada ka dhex muuqato ama ka dhex hadasho, wax walba oo dhacaya ama la odhanayaana waa in ay ka mid yihiin qulqulka sheekada. Ka soo qaad qoraaga oo sida ay sheekadu u socota ku yidhaahda "sheekda waan kuu sii wadi doonaaye" iswm?

Suugaantu guud ahaan iyo sheekadu gaar ahaan inta muuqato uun ma aha ee waxaa ku jira wax badan oo dahsoon. Haddii aad ku guulaysato akhristuhu sheekadaada in uu ka la soo baxo wax aadan toos ugu sheegin waa kuu guul. Sheekada oo dhan waad u qori kartaa si maldahan, laakiin maldahaa waa in ad si wacan u dhistaa si lagu la garto. Haddii kale keligaa baa isla sheekaystay.

Samee tab iyo xeelad walba oo sheekadaada xiise iyo nuxur siin kara, adiga oo ka faa'iidayanaya sida aad adigu u aragto sheeko wacani in ay ahaato, dadkuna isku sheekayn ma aha ee adigu taada kuu gaarka ah soo saar. Laba qof oo aad taqaan marka ay kuu wada sheekeeyaan mid baad jeclaysataa in uu kuu sii wado, ka kalena markiiba waad ku caajistaa, sababta oo ah sida ay u sheekeeyaan baa ka la duwan. Qoristuna waa la mid. Isa sii xorriyad iyo kalsooni aad hibadaada halabuur iyo khayaaligaaga ku godosho oo ku maasho.

Xaqdhawr wax kasta oo dadka u dhawrsan sida diimaha iyo dhaqammada, laakiin ha ka biqin in aad aragtidaada ka dhiibato, iyo in aad dhaliisha kuu muuqata taabato. Ogowna cidda wax dhaliilaysa ama ammaanaysaa qoraaga ma aha ee waa shakhsiyaadka sheekada iyo garashadooda.

Suugaantaada ha u adeegsan colaadinta qof gaar ah oo aadan jeclayn. Haddii ay dhacdo in aad fankaaga u adeegsato qiso ku saabsan qof dhab ah oo aad taqaan ama maqashay aad iyo aad uga taxaddar in aad qofkaa dhab u muujiso, haddii aadan daynaynna u dhig si asturan oo milge leh.

Xusuunow weligaa oo sheeko faneed waxa ugu liidata ta madhan ee farshaxannimo ka arradan, ama dunida ay ka hadlayso dhab u matali kari wayda. Waxaana ugu wanaagsan ta waxa ay ka hadlayso si wacan uga run sheegta, muuqaal ahaan iyo nafsiyad ahaanba, laguna qoro luqad macan iyo khayaali hodan ah. Ta dambe akhristuhu weligeed iyo waaqii ma illaawo.

Ugu horrayn iyo ugu dambaynba ogow tebinta sheekadu in ay marto saddex heer oo ka la ah: 1) Ganid 2) Cirbax iyo 3) Hoobasho. Heerka hore xadhkaha qisada ayaa la soohaa oo ammuuraha ka dhex oogmi doona ayaa la maleegaa. Heerka labaad qaddiyaddii oognayd baa loollankeedu fiidda ugu sarraysa gaadhaa. Heerka hoobashadana halgankii iyo loollankii socday baa wax uun ku dhammaada oo natiijo yeesha. Ku dadaal haddaba sheekadaada in aad u bilawdo si xalladaysan si aad markiiba akhristaha u hanato. Qaybta hore ku abuur dhibaataada ama mushkiladaha aad doonayso in aad legdan ka dhaliso, una yeel sababo maangal ah oo khilaafkaasi ku yimaaddo. Akhristuhu waa in uu ka garaabaa sababaha muuqdaa in ay qarax dhalin doonaan.

Khasab ma awoodaha loollamayaa in ay noqdaan dad isdiiddan, wax ay se noqon karaan wax kasta oo kale, xitaa qof qudha iyo naftiisa legdanka ka dhex socda, ama dad iyo dugaag, dugaag dhexdii, walxo aan noolayn oo la qofeeyay iwm. Mana aha uun loollan gacan ah ee mid fikir ama mid nafsiyadeed ayuu ahaan karaa. Qoraagii weynaa ee Maraykanka ahaa ee la odhan jiray Ernest Hemingway, qisadii lagu siiyay abaalmarinta Nobel waxa ay ku saabsanayd oday kalluumaysato ah iyo kalluun aad u weyn oo uu tabtay wixii hoog ka la qabsaday. Sheekadasi waa ta la yidhaahdo "The Old Man and the Sea".

Kolka geeddiga qisadu dhammaado ha sii jiidjiidin ee si degdeg ah u soo afjar, kuna dhaqan murtida ah "hadal sii dheh baa dishay". Qisadii oo nuxurkeedii dhammaaday haddii la sii wadwado akhristaha ayay wixii uu soo akhriyay oo dhan ka dhabqin kartaa. Gunaanadkuna isaga oo sheekada ku taxan xusuusreeb ha yeesho.

<http://www.weedhsan.com/index.php/qalinleyda-weedhsan/6374-sheekadeenna-wq-ibraahin-yuusuf-axmed-hawd>

08.10.2013